



My.PPS - Single Sign-On waa teknoolajiyad u oggolaaneysa macallimiinta iyo ardayda inay

Wada isticmaalaan wax kasta oo ay rabaan hal meel oo laga soo galayo!

Waalidiinta Qaaliga ah,

Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxa ay hadda isticmaalayaan My.PPS ee ClassLink, kaasi oo ah hal madal laga galayo taasi oo u oggolaaneysa macallimiinta iyo ardayda inay isticmaalaan magaca iyo furaha sirta ah si ay u helaan wax kasta oo ay rabaan. Single sign-on waa qalab muhiim ah sidii hawsha aad qabaneysaa u noqon lahayd mid waxtar leh marka waxbarashada lagu qaadanayo meel ka baxsan fasalka gudhiisa, iyada oo My.PPS ay u addeegi doonto ilmahaaga waxbarashada fasalkiisa, haddii ay tahay fasalka dhexdiisa ama isaga oo fadhiya fadhiga gurigiisa.

My.PPS waxaa laga gali karaa kumbuuyatar ama qalabka gacanta lagu qaato. Fadlan waxaad raacdaa tilmaamaha xagga hoose ku yaala iyo Qalabkayada Dijitalka PPS ah [tutorials](#) si aad u bilowdo.



Waa tani sida aad u caawin karto ilmahaaga siduu ugu bilaabi lahaa **kumbuuyutar**:

1. Waxaad tegtaa shabakadani:
<https://launchpad.classlink.com/ppsor>
2. Waxaad gashaa magaca ardaygaaga PPS iyo furaha sirta ah ka dibna guji **SIGN IN** (kaliya isticmaal qeybta hore ee magaca, ha galanin '@student.pps.net')
3. Marka ay ardayda PK-3 iskuulka ku soo noqdaan waxa ay heli doonaa QuickCard kaasi oo uu siin doonaan macallimiintooda sidii ay uga geli lahaayeen iyaga oo isticmaalaya kamarada.

Waa tani sida aad u caawin karto ilmahaagu siduu u bilaabi lahaa **qalabka moobaaylka**:

1. La soo deg barnaamijka ku haboon:
iOS
Google Play
QuickCard ee ClassLink (dadka isticmaala iPad ee isticmaalayaasha QuickCard)
2. Guji falaarta geesta midig ee xagga sarre si aad uga raadiso ka dibna ka dooro "Portland PS 1J" (hal mar kaliya ayaad dooraneysaa).
3. Waxaad galisaa magaca uu isticmaalayo ardaygaagu ee PPS iyo furaha sirta ah ka dibna guji **SIGN IN** (kaliya waxaad isticmaal qeybta hore ee magaca aad isticmaalayso, ha galanin '@student.pps.net')
4. Marka ay ardayda PK-3 iskuulka ku soo noqdaan waxa ay heli doonaan QuickCard oo uu siin doonaan macallimiintooda sidii ay

| | |
|--|--|
| | uga soo geli lahaayeen iyaga oo isticmaalaya kamarada. |
|--|--|

My.PPS waa mid nabadgelyo ah oo la ilaaliyey sidii loo hubin lahaa in ilmahaagu ka heli karo wax kasta oo uu uga baahan yahay sidii uu waxbarashadiisa u sii wadan lahaa. Waxaan rabnaa inaad ogaato software marnaba ma ururiyo ama la wadaago macluumaadka shakhsiga ah ee ardayga. Waxaad wax badan ka akhridaa shirkada na siisa addeega Classlink sida ay uga go'an tahay ilaalinta [waxyaabaha qofka u gaarka ah](#). Haddii aad hayso su'aalo, waxaad la xiriirtaa si toosa miiska taageerada PPS: support@pps.net

Mahadsanid!